Taariikhda:09/03/2024

# War-bixin ku saabsan awoodaha Hay'adda Sirdoonka Qaranka iyo Maxkmadaha Ciidamada iyo cidda awoodda u leh baadhista.

## B. Hordhac

Ururka Qareenadda Somaliland waxa uu Guddi Gaar ah u saaray baadhista xogaha la xidhiidha cabashooyin soo kordhay oo ku saabsan eedo ah in Hay'adda Sirdoonka Qaranku ay sifo sharci darro ah u xidho dad shacab ah, ugu hayso goobo aan xeer jideyn, islamarkaana u horgeyso maxkamadaha ciidanka.

Baadhitaanka Guddida Gaarka ah waxa uga soo baxday in Hay'adda Sirdoonka Qaranku ay xidhay dad, ku xidhay goobo iyada u gaar ah oo aan ahayn saldhig iyo xabsi islamarkaana ay horgeysay maxkamadda ciidanka. Dadka la xidhay waa dad shacab ah oo ay ka mid yihiin suxufiyiin iyo culimo u diin.

Su'aasha mudan in laga jawaabaa waxay tahay talaabooyinka aan kor ku sheegnay ee ay qaaday Hay'adda Sirdoonka Qaranku sharciga ma waafaqsan yihiin? Haya'dda Sirdoonku awood ma u leedahay inay cid xidho, baadho, eedayso, maxkamadda horgeyso, goobo gaar ah oo aan Xabsi/Saldhig ahayn na ku xidho dadka?

Sidoo kale ma banaan tahay in dadka shacabka ah ee aan gelin dembiyo leh dabeecad ciidan lagu maxkamadeeyo Maxkamada Ciidan?

Iyada oo laga duulayo waydiimahaas sharci, Guddida Gaarka ahi waxa ay dersitay Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Xeerk Sirdoonka Qaranka, Xeerka Xabsiyada, Xeerka Habka Ciqaabta iyo xeerarka caalamiga ah ee xuquuqal insaanka. Kuwaas oo lagu salleeyey warbixinta sharci.

Dalka Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu leeyahay Dastuur iyo xeerar dhaqangal ah oo kala duwan oo aan ka hor imanayn Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. Xeer kasta oo dhaqan gal ah oo waxa loo sameeyey duruuf iyo xaalad loogu talo galay in uu xal u noqdo isla markaana xeerarkaasi waxay kala hagayaan hawlaha shaqo iyo masuuliyaadka ay kala leeyihiin hayadaha kala duwan ee dawlada Jamhuuriyadda Somaliland. Hay'ad kastaana waxay leedahay xeer qeexay awoodeheeda, masuuliyadeeda iyo qaab dhismeedkeeda oo ku dhisan xeer dhaqan gal ah.

Hadaba Hay'adda Sirdoonka Qaranku waxay ka mid tahay hay'adaha madaxa bannaan ee Dawladda Jamhuuriyaddda Somaliland. Waxaanay ku aasaasan tahay Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka **Xeer Lr: 59/2013** oo siiyey awoodo waafaqsan Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. Xeerkaas waxa ku cad shaqo kasta iyo awood kasta oo ay leedahay Hay'adda Sirdoonka Qaranku.



somaliland lawyers association (SOLLA) Ururka Qareenada Somaliland

Talaabo kasta oo ay qaaddo Hay'addu oo ka hor imanaya ama aan ku waafaqsanayn Dastuurka, Xeerka Sirdoonka Qaranka iyo xeer kale oo dhaqangal aj waa xaaraan iyo xeer jebin.

**T. Xeerarka Dalka Jamhuuriyadda Somaliland u yaalaa Maxay ka qabaan dhacdooyinka sare ku xusan ee ay qaaday Hay'adda Sirdoonka Qaranku?**

Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland waa xeerka ugu sareeya xeerarka dalka u yaala, waxaanuu mamnuucay waxkasta oo ka hor imanaya Shareecada Islaamka sida ku cad qodobka 128aad ee Dastuurka.

1. **Qodobka 25(1, 2) aad** ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu sheegayaa inaan qofna xorriyadda looga qaadin si aan xeerka waafaqsanayn waxaanuu u dhigan yahay sidan "qofna xorriyaddiisa loogama qaadi karo si aan xeerka waafaqsanayn. Mana bannaana in qofna la qabto, la baadho ama la xayiro, haddii uusan markaa dembi faraha kula jirin, ama aanu amar qabasho oo sababaysan ku soo saarin Garsoore awood u lihi."

2. Sidoo kale **qodobka 27 (4)** ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu sheegayaa inaan qofna lagu xidhi karin meel aanu sharcigu bannayn waxaanuu u dhigan yahay sidan "Waxa reebban in qofka lagu xidho meel aanu xeerku bannayn"

3. Qodobka **8(1)aad Xeer Lr.59/2013,** Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka, wuxuu sheegayaa awooddaha iyo waajibaadka Hay'adda Sirdoonka Qaranka waxaanuu u dhigan sidan " in markasta oo ay ka warhesho, ama sabab macquul ah awgeed ku rumaysato in la qorshaynayo faldembiyeed ay **wargeliso Hay'adda qaabilsan ka hortagga dembiyadda".**

4. Qodobka 15(1,5,7,8)aad Xeer Lr. 63/2013, Xeerka Ciidanka Booliiska Jamhuuriyadda Somaliland, waxa uu qeexayaa Waajibaadka Guud ee Ciidanka Booliska, waxaanay u dhigan yihiin sidan
   a. **Qodobka 15(1) Xeer Lr. 63/2013:** Illaalinta iyo sugida nabadgelyada dalka guddihiisa. Waxaa u xilsaaran oo uu xeerku awood u siiyey Ciidanka Booliiska Jamhuuriyadda Somaliland waana waajibaadkiisa sharciga ah
   b. **Qodobka 15(5) Xeer Lr. 63/2013:** Ka hortagga iyo baadhista denbiyada si waafaqsan Xeerarka dalka. Waa awoodaha iyo waajibaadka Ciidanka Booliiska Jamhuuriyada Somaliland
   c. **Qodobka 15(7) Xeer Lr. 63/2013** Dabagalka iyo soo qabashada eedaysanyaasha iyo horgeyntooda maxkamadda. Waa awoodaha iyo waajibaadka uu xeerku siiyey Ciidanka Booliiska Jamhuuriyada Somaliland
   d. **Qodobka 15(8) Xeer Lr. 63/2013:** Oogista dacwaddaha maxkamaddaha hortooda ay booliisku wakiil uga noqon karaan falkii iyo heerkii uu xeer ilaaliyaha guud u igmaddo.

5. **Qodobka 16(1,6)aad Xeer Lr. 63/2013 oo ka hadlaya** Awooddaha Ciidanka Booliiska waxaanay u dhigan yihiin sidan Ciidanka Booliisku waxay awood u leeyihiin
   a. In ay qabtaan, xidhaan, iyagoo sharciga u raacaya cid kasta oo fal denbiyeed diyaarinaya, isku dayaya, amaba faraha kula jirta si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale.

(SOLLA) Ururka Qareenada Somaliland

b. In ay ku horgeeyaan eedaysanayaasha Maxakamada horteeda muddo aan ka badnayn 48 saacadood gudohood

6. **Qodobka 6 Xeer Lr. 65/2014,** Xeerka Xabsiyadda Somaliland waxa uu reebayaa inaan qofna lagu xidhi Karin meel aan xabsi ahayn waxaanuu u dhigan yahay sidan "waxa reeban in dalka jamhuuriyada Somaliland ay ka jirto goob lagu hayo dadka Xorriyadooda laga qaaday dhaqancelin darteed oo aan ahayn xabsiyada marka laga reebo
    a. Xarumaha dhaqan celinta ee waafaqsan xeerka Cadaalada Caruurta sharciga khilaafta Xrl: 36/2007 iyo
    b. Saldhigyaa Booliiska, Xarumaha Baadhista Dembiyada ee Ciidanka Booliiska ee si sharciga waafaqsan baadhis awgeed dad loogu hayn karo muddo xeerarku xadideen

7. Sidoo kale Xeerka Habka Ciqaabtu waxa uu siinayaa doorka baadhista, xidhista sababaysan, horgeynta maxkamadaha awooda u leh, saldhig ku haynta iyo soo gudbinta gungaadhka baadhista waxa uu si cad u siiyey Ciidanka Booliiska Jamhuuriyadda Somaliland sida ku cad qodobada **24 ilaa 58 ee Xeerka Habka Ciqaabta.**

**J. Gebo-gebo**

Hadaba Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo xeerarka sare u xusan oo dhan waxay sidaa cad u bayaamiyeen awoodaha ay kala leeyihiin hay'adaha aminga iyo cadaaladu iyo qiimaha ay leedahay xoriyadda qofka muwaadinka ah, xaqa uu u leeyahay inuu helo xuquuqda dastuurka iyo shuruucda kale siiyeen oo ka mid tahay maxkamad caddaalad ah.

Sidaa awgeed si looga jawaabo su'aasha ah yaa leh oo sharcigu siiyey awoodaha xadhiga, baadhista, eedaynta, horgeynta maxkamad awood u leh iyo ku haynta xabsi/saldhig sharcigu aqoonsan yahay waxa waajib ah in loo habraaco Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Booliiska Xeer Lr. 63/2013, Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka Xeer Lr. 59/2013, Xeerka Xabsiyada Xeer Lr. 65/2014 oo dhamaantood kor ku xusan.

Dhamaan xeerarka sare ku xusan waxay caddeeyeen inaan Hay'adda Sirdoonka Qaranku xaq u lahayn xeerna siin awoodaha xadhiga, baadhista, eedaynta, iyo horgeynta Maxkamad awood u leh mid ciidan iyo mid madani ahba.

Haddaba xadhig kasta iyo hayn qof oo lagu xidhay meel aan sharcigu u aqoonsan xabsi/saldhig oo ay samaysay Hay'adda Sirdoonka Qaranku waa sharci darro iyo gabood fal aan shuruucda Jamhuuriyadda Somaliland waafaqsanayn. Sida ku cad qodobka 27aad, faqradiisa 9aad ee Dastuurka, waa inay ka dhalato ciqaab oo ay ku mutaysato cidda jebisay dastuurka iyo xeerarka dalka.

Arrinta labaad ee xusidda mudan waxa weeyey in Hay'adda Sirdoonka Qaranku ay dad shacab ah oo aan sinaba ula xidhiidhin ciidannimo ay ku xidhay goobo gaar ah oo sharcigu reebay, horgeysay Maxkamada ciidan, samaysay baadhis iyo gungaadh. Talaabooyinkaasi waxay si cad u khilaafsan yihiin Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, gaar ahaan Qodobka **104 Dastuurka** oo caddeeyey in Maxkamadaha Ciidamadu gaar u yihiin Xubnaha Ciidamada oo keliya waxaanuu u dhigan yahay sidan "Maxamadaha ciidamadu waxay gaar u yihiin dhegaysiga dembiyada ciqaabta ee lagu oogo xubnaha ciidamada Qaranka xaaladaha nabadda iyo dagaalka"

(SOLLA) Ururka Qareenada Somaliland

Ugu dambayntii Baadhistan waxaa ka soo baxay inay tahay sharci darro iyo dastuur jebin tallaabooyinka ay qaaday Hay'adda Sirdoonka Qaranka oo ah baadhista, horgeynta, ku haynta goobo gaar ah, baadhista goobaha gaar ka ah ee muwaadiniinta iyo in dad shacab ah la saaro maxkamada ciidan sifo ka soo horjeedda Dastuurka Somaliland.

## X. Talo soo jeedin

- Guddidu waxa ay u soo jeedinayaan Maxkamadda Sare iyo Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Qaranka inay qaadaan tallaabooyinka sharci ee kaga beegan si ay ugu soo dabaalan Hay'adda Sirdoonka Qaranka xayndaabka sharci islamarkaana loo ilaaliyo dastuurka iyo xeerarka dalka u yaal.

- Guddidu waxa ay soo jeedinaysaa Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Somaliland inuu qaado tallaabooyinka ku habboon ee xeerarku u ogol yihiin si uu u joojiyo gabood falyada ay gaysanayso Hay'adda Sirdoonka oo u dhaqmaysa hanaan aanay hore u arag Somaliland tan iyo 1991.

- Guddidu waxa ay u soo jeedinaysa Golaha Wakiilada ee Jamhuuriyadda Somaliland inuu la xisaabtamo madaxda Hay'adda Sirdoonka Qaranka.

- Guddidu waxa ay soo jeedinaysaa in dhamaan dadka shacabka ah ee dacwadohoodu horyaallin maxkamadda ciidanka in lagu wareejiyo maxkamadaha rayidka ah.

- Guddidu waxa ay soo jeedinaysaa in la xidho goobaha sharci darada ah ee ay Hay'adda Sirdoonku dadka ku hayso islamarkaana in dhamaan dadkaas xorriyadooda loo soo celiyo, wixii xog ah ee ay hayso Hay'adda Sirdoonkuna inay la wadaagto hay'adda awoodda u leh baadhista oo ah Booliiska Jamhuuriyadda Somaliland sida waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Booliiska iyo Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka oo ku binaysan Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Guddida gaarka ah ee Ururka Qareenada Somaliland**

| | | |
|---|---|---|
| 1. **Mubaarig Maxamuud Cabdi** | **Gudoomiye** | ---------- |
| 2. **Maxamed Xuseen Caraale** | **Xubin** | ---------- |
| 3. **Maxamuud Cabdiraxmaan Nuur** | **Xubin** | ---------- |
| 4. **Mukhtaar Daahir Jibriil** | **Xubin** | ---------- |
| 5. **Xuseen Shabeel Cabdilahi** | **Xubin** | ---------- |

somaliland lawyers association * (SOLLA) * Ururka Qareenada Somaliland